

OR PTC DCI
Hagaha Macmiilka

Tusmada

- Waa maxay EVV
 - Xeerka Cures ee Qarniga 21-aad
- Waa maxay OR PTC DCI
 - Xalka EVV ee Oregon
 - Erayada Guud
- Noocyada Waqti Gelinta
 - App-ka Taleefonka ee OR PTC DCI
 - Nocyada Xaqiijinta
 - Taleefonka Fiilada ee OR PTC DCI
 - Waqti Gelinta Waqtiga Saxda ah
 - Waqti Gelinta Waqtiyada Tagay
 - OR PTC DCI Fob
 - OR PTC DCI Web Portal
- Bogga Internetka ee OR PTC DCI
 - Magaca Adeegsadhaha iyo Lambar Sireedka
 - Gelidda Marka Koowaad ah
 - Su'aashada Ammaanka
 - Guudmarka Dashboard-ka
 - Oggolaanshaha
 - Waqti Gelinta u Baahan Ansixinta
 - Guudmarka Qeybta Farriimaha
- App-ka Taleefonka ee OR PTC DCI
 - Kala Soo Degidda App Store
 - Gelida
 - Dashboard-ka
 - Waqti Gelinta u Baahan Ansixinta
 - Farriimaha
- Talaabooyinka Xiga
 - Sameynta Cinwaan Iimayl
- Taageero
 - Xarunta Caawinta ee DCI
 - Dhigaalada Mashruuca PTC



Waa maxay Electronic Visit Verification (EVV)



What is Electronic Visit Verification (EVV) (Nidaamka Lagu Xaqiijiyo Soo Xaadirida Shaqaalaha)?

Dawlada Federaalka ah waxay fartaa gabolada inay macluumaad gaar ah ku soo uruuriyaan elektaroonig ahaan marka la bixinayo adeegyada daryeelka shaqsiyadeed, tani waxaa laga soo xigtay 21st Century Cures Act (Xeerka Cures ee Qarniga 21aad)

- Tani waxaa loo yaqaanaa Nidaamka Lagu Xaqiijiyo Soo Xaadirida Shaqaalaha (EVV)
- Tani waxay baddel u noqon doontaa nidaamka foojarka warqadaha la adeegsado ee hadda jiro

Warbixintan soo socoto ayaa laga qoraa booqasho walba:

- Taariikhda adeegga la bixiyay
- Waqtiga La Bilaabay/La Dhameeyay
- Nooca adeegga
- Goobta adeegga
- Magaca Bixiyaha
- Magaga Macmiilka adeegyada la siinayo




Waa maxay OR PTC DCI?



Waa maxay OR PTC DCI?

- OR PTC DCI Waxay u taagan tahay Oregon Provider Time Capture Direct Care Innovations.
- Direct Care Innovations (DCI) waa qalab waqtiga diiwaangeliya oo elektaroonig ah.
- Gobalka Oregon wuxuu hadda isticmaali doonaa OR PTC DCI baddelki foojarada warqadaha ah.
- App-ka Taleefonka ee OR PTC DCI waxaad kula soo dagi kartaa taleefonkaaga casriga ah.
- Bixiyeyaasha waxay u adeegsan doonaan OR PTC DCI inay geliyaan waqtiga la shaqeeyay iyo maylka.
- Waxaad u isticmaali doontaa OR PTC DCI inaad ku ansixiso waqtiga Bixiyaha.



Erayada Guud

- **Kaliyenti:** Cinwaanka Macmiilka ee ku jira OR PTC DCI ayaa loo yaqaanaa Cinwaanka Macmiilka. Waxaa arki doontaa eray oo laga isticmaalayo guud ahaan nidaamka.
- **Wakiilka:** Haddii aad leedahay wakiilka Macmiilka Loo-shaqeeyaha ah, waxay isticmaali doonaan cinwaan ku jira OR PTC DCI oo loo yaqaano Cinwaanka Wakiilka.
- **App-ka Taleefonka ee OR PTC DCI:** Bixiyahaaga (Bixiyeyaashaada) waxay u isticmaali karaan app-ka taleefonka inay ku qoraan waqtiga bilowga iyo dhamaadka. Waxaad u baahan kartaa inaad ansixiso adeegyada aad hesho adiga oo isticmaalaya app-ka taleefoonka Bixiyaha ama adiga app-ka taleefonkaaga.
- **Waybsaydka Wayn ee Taleefonka ee OR PTC DCI:** Waybsaydka wayn ee OR PTC DCI waxaa laga gali karaa taleefonka gacanta. Sahmi bogga waybsaydka DCI ee ku jira taleefonkaaga gacanta. Ka dibna guji "Go to Full Site" ("Tag Waybsaydka Wayn" oo ka hooseysa badhanka Sign In (Gal)).
- **Waybsaydka Taleefonka ee OR PTC DCI:** Waybsaydk taleefonka waa nooc OR PTC DCI ah oo taleefonka ku wanaagsan. Taleefonkaaga casriga ah ayaa si otoomaatiga ah isku gelin doona waybsaydka taleefonka marka aad waybsaydka DCI ka sahmidid biraawsar.



Erayada Guu

- **Taleefonka Fiilada ee OR PTC DCI:** Bixiyeyaashaada waxay u adeegsan karaan taleefonkaaga fiilada inay ku qoraan waqtiga bilowga iyo dhamaadka, ama ay ku xareeyaan gelinta waqtiyada tagay.
- **Bogga Intarnetka ee OR PTC DCI:** Bogga Intarnetka ee OR PTC DCI ee wayn. Bogga intarnetka waxaa laga geli karaa kumbiyuutarada desktop-ka iyo laptop-ka.
- **Magaca adeegsadaha:** Magaca ay hay'adda ku siisay si aad ugu gasho OR PTC DCI.
- **Lambarka sireed:** Lambar sireedka ay hay'adda ku siisay si aad ugu gasho OR PTC DCI, Kani wuxuu u baahan doonaa inaad baddesho marka koowaad ee aad gasho



Noocyada Waqti Gelinta



Noocyada Waqti Gelinta

Waqti gelinta waa kuwa u hoggaansan EVV haddii Bixiyeyaasha ay adeegsadaan mid ka mid ah hababkan waqti gelinta ee soo socda:

- App-ka Taleefonka ee OR PTC DCI
- Taleefonka Fiilada ee OR PTC DCI
- OR PTC DCI Fob

Waa inaad kala shaqeyso Bixiyehaaga (Bixiyeyaashaada) inaad go'aamiso habka ama hababka ugu wanaagsan labadiinaba. Waxaad isticmaali kartaa habab fara badan haddii loo baahdo.



Waqti Gelinta App-ka Taleefonka ee OR PTC DCI



App-ka Taleefonka ee OR PTC DCI waa barnaamij taleefon oo bilaash ah oo u oggolaanaya Bixiyaha inuu si sahlan ku qoro waqtiga bilowga iyo dhamaadka oo uu ku guto xaqiijinta EVV isaga oo isticmaalaya taleefonkiisa casriga ah.

Si uu u isticmaalo App-ka Taleefonka ee OR PTC DCI, Bixiyaha waa waajib:

- Inuu heysto taleefon/aalad casri ah (Android ama Apple)
- Inuu buuxiyo shuruudaha nidaamka uu ku shaqeeyo (Android 8.0, Apple iOS 13 iyo wixi ka koreeya)
- Inuu heysto internet oo uu ka helayo internetka lafta taleefonka ama WIFI
- Haddii uu isticmaalayo App-ka Taleefonka ee OR PTC DCI, Bixiyaha wuxuu qori doonaa waqtiga bilowga markuu niska bilaabo wuxuu sidoo kale qori doonaa waqtiga dhamaadka markuu niska shaqada dhameeyo. Inta lagu jiro qorista waqtiga dhamaadka, Bixiyaha (Bixiyeyaasha) waxay had iyo jeer dooran doonaan Client Portal Signoff (Ansixinta Bogga Kaliyentiga). Waa inaad ansixiso waqti gelintan dhamaadka xilli mushahareedka.

Noocyada Xaqiijinta ee App-ka Taleefonka ee OR PTC DCI

Haddii uu isticmaalayo App-ka Taleefonka ee OR PTC DCI, Bixiyaha wuxuu qori doonaa waqtiga bilowga markuu niska bilaabo wuxuu sidoo kale qori doonaa waqtiga dhamaadka markuu niska shaqada dhameeyo. Inta lagu jiro qorista waqtiga dhamaadka, Bixiyaha wuxuu dooran doonaa mid ka mid ah noocyada xaqiijinta ee soo socda:

- PIN/Lambar Sireed
- Saxiixa
- Xaqiijinta Bogga Macmiilka

Back Clock Out Verification

Clock Out Verification Required

EVV Location - None -

PIN or Password

E-Signature

Client Portal Signoff

Client Name: Consumer Training
Service Code: Hourly ADL/IADL-1
Clock In Time: 11:14 AM (PT)



Noocyada Xaqiijinta ee App-ka Taleefonka ee OR PTC DC – Pin/Lambar Sireed

Haddii Bixiyaha uu kula joogo markuu qorayo waqtiga dhamaadka, waxaa laga yaabaa inay kaa dalbadaan inaad ansixiso waqtiga iyo adeegyada ay geliyeen taleefonkooda gacanta.

1. Geli PIN-kaada ama Lambar Sireedkaada
2. Guji Submit (Gudbi)

Back Clock Out Verification

Enter PIN or Password


Submit

Client Name: Consumer Training
Service Code: Hourly ADL/IADL-1
Clock In Time: 11:14 AM (PT)

Xusuusin: PIN-kaaga waa, sida lagu soo sameeyay, 4-ta tiro ee ugu danbeysa lambarkaaga taleefonka ee koowaad.

Noocyada Xaqiijinta ee App-ka Taleefonka ee OR PTC DC – Pin/Lambar Sireed


3. Hadii aad si qaldan u galisid PIN-kaaga ama Lambar Sireedkaaga, waxaad heli doonaa digniin. Riix confirm (xaqiiji) oo mar kale isku day.
4. Hadii aad si qaldan u galisid PIN-kaaga ama Lambar Sireedkaaga 3 jeer, ma awoodi doontid inaad isticmaasho qaabkan si aad u xaqiijiso niska. Qaabkan wuxuu diyaar u noqon doonaa inaad isticmaasho markale niska shaqada xiga ee Bixiyahaaga.



Noocyada Xaqiijinta ee App-ka Taleefonka ee OR PTC DCI – Saxiixa

Haddii Bixiyaha uu kula joogo markuu qorayo waqtiga dhamaadka, waxaa laga yaabaa inay kaa dalbadaan inaad ku saxiixdo magacaaga si aad u xaqiijiso adeegyada.

1. Bixiyaha wuxuu kuu dhiibi doonaan taleefonkooda gacanta. Waxaad isticmaali kartaa qalabka aad hadda isticmaasho si aad u bixiso saxiixa
2. Haddii aadan jeclaysanin saxiixaaga, Guji badhanka Clear (Tirtir) si aad markale iskuugu daydo
3. Marka aad hesho saxiix aad jecleysato, guji Save (Keydi)
4. Guji Confirm (Xaqiiji)



Noocyada Xaqiijinta ee App-ka Taleefonka ee OR PTC DC – Ansixinta Bogga Kaliyentiga.

Bixiyaha wuxuu dooran doonaa Ansixinta Bogga

Kaliyentiga haddii:

- Aad leedahay Wakiilka Macmiilka Loo-shaqeeyaha ah
- Aadan la joogin Bixiyaha marka ay qorayaan waqtiga dhamaadka shaqada
- Aadan rabin inaad ansixiso adeeg isla markaas

Haddii Bixiyaha uu doorto Client Portal Sign Off (Ansiinta Bogga Kaliyentiga), adiga (ama Wakiilka Macmiilka Loo-shaqeeyaha, haddii aad leedahay mid) waa inuu ansixiyo waqti gelinta dhamaadka xilli mushahareedka.

Waxaad ku baran doontaa sida midan loo sameeyo cashir kale.

Back Clock Out Verification

Clock Out Verification Required

EVV Location - None -

PIN or Password

E-Signature

Client Portal Signoff

Client Name: Consumer Training
Service Code: Hourly ADL/IADL-1
Clock In Time: 11:14 AM (PT)



Waqti Gelinta Taleefonka Fiilada ee OR PTC DCI

Taleefonka Fiilada ee OR PTC DCI waa nooc loogu talagalay Bixiyeyaasha inay ku qoraan waqtiga haddii uu kuu yaalo taleefonka fiilada meesha aad adeegga ku qaadato, sidoo kale Bixiyahana uusan heli karin aalad casri ah.

- Taleefonka fiilada waxaa loo isticmaali karaa gelinta waqtiyada saxda ah iyo waqtiyada tagay.

Si aad u isticmaasho Taleefonka Fiilada ee OR PTC DCI:

- Waa inuu kuu yaalo taleefonka fiilada guriga aad adeegga ku qaadato.
- Waa in taleefonka fiilada aad ka soo xaqiijiso Xafiiska Deegaankaada.

Ogoow: Taleefonka Fiilada OR PTC DCI kuma shaqeeyo taleedonada lambarada wareega ku qora.



Waqti Gelinta Taleefonka Fiilada ee OR PTC DCI

Waqtiga Saxda ah

- Waqti gelinta ayaa loo tixgelin karaa mid waqtiga saxda ah haddii Bixiyaha uu qoro waqtiga bilowga markuu niska bilowdo sidoo kalana uu qoro waqtiga dhamaadka markuu niska dhamaado.
- Bixiyaha waa inuu wicitaanka ka soo diro lambarkaaga taleefonka fiilada ee kuugu fayl gareysan OR PTC DCI.
- Lagaagama baahno inaad xaqiijiso waqti gelinta waqtiga saxda ah ee taleefonka fiilada.
- Waxaad u baahan tahay inaad xaadir ahaato waqtiga bilowga iyo dhamaadka.



Waqti Gelinta Taleefonka Fiilada ee OR PTC DCI

Waqtiga Tagay

- Waqti gelinta ayaa loo tixgelin karaa waqti tagay haddii la geliyo markii adeegyada la bixiyay ka dib.
- Waqti gelinta taleefonka fiilada ee waqtiyada tagay ma **ahan** EVV kuwa u hoggaansam waana in la adeegsadaa mar mar dhif ah.
- Bixiyaha waa inuu wicitaanka ka soo diro lambarkaaga taleefonka fiilada ee kuugu fayl gareysan OR PTC DCI.
- Markii waqtiga la gelinayo, Bixiyaha ayaa kuu dhiibi doona taleefonka. Nidaamka ayaa akhrin doona faahfaahinta waqti gelinta oo kaa dalbi doona inaad xaqiijiyo adiga oo gelinaya PIN-kaada. PIN-kaaga waa lambar tiro 4-god ah leh oo ay bixiso Hay'adda.

Ogoow: Haddii aadan xaadir u ahaan doonin waqti gelinta waqtiga tagay, fadlan u sheeg Bixiyaha inuu ku xareeyo waqti gelintan waqtiyada tagay bogga internetka ee OR PTC DCI.



OR PTC DCI Fob

The OR PTC DCI Fob waa hab kale oo EVV ah oo aad adeegsan karto haddii Bixiyaha uusan haysanin aalad casri ah sidoo kale adigana uusan kuu yaalin taleefonka fiilada halka adeeydada aad ku qaadato.

- Fob waa aalad yar oo lagu dhejinayo gurigaaga.

Si uu u isticmaalo OR PTC DCI Fob:

- Bixiyaha waa inuu heli karo fob bilowga iyo dhamaadka niskiisa shaqada.
- Bixiyaha waa inuu heli karo internet dhamaadka xilli mushaareedka si uu ugu xareeyo lambarada fob Bogga Internetka ee OR PTC DCI.

Ogoow: Lagaagama baahno inaad ansixiso waqti gelinta laga sameeyay fob.



Waqti Gelinta Bogga Intarnetka ee OR PTC DCI

Haddii Bixiyaha uusan aawoodin inuu geliyo waqtigiisa iyaga oo adeegsanaya hab EVV u hoggaansan ama adiga aadan xaadir u ahayn waqti gelinta teleefonka fiilada ee waqtiga tagay, waxay gelin karaan waqtiga tagay iyaga oo isticmaalaya:

- Bogga Intarnetka ee OR PTC DCI

Haddii Bixiyaha uu geliyo waqti Bogga Intarnetka ee OR PTC DCI, waa inaad ansixiso waqtigan dhamaadka xilli mushahareedka si Bixiyaha mushar loo siiyo.



Bogga Intarnetka ee OR PTC DCI



Bogga Intarnetka ee OR PTC DCI

Maadaama hadda aan dib u eegnay noocyada waqti gelinta ee adiga iyo Bixiyahaaga (Bixiyeyaashaada), aynu ka hadalno sida adiga Macmiil ahaan aad ku gali doonto oo aad u isticmaali doonto Bogga Intarnetka ee OR PTC DCI. Waxaad u isticmaali kartaa bogga intarnetka inaad:

- Eegto oggolaanshaha adeeggaaga
- Ansixiso oo aad diido waqti gelinta
- Eegto dhammaan waqti gelinta adeegyada ay heleen Bixiyahaaga (Bixiyeyaashaada)
- Isticmaasho Qeybta Farriimaha ee OR PTC DCI
- Isticmaasho Xarunta Kaalmada ee DCI



Magaca Adeegsadaha iyo Lambar Sireedka

Waa maxay magaca adeegsadaha?

- Magacaaga adeegsadaha waxaa ku siin doona Hay'adda. Sida caadiga ah, magacaaga adeegsadaha wuxuu u qoran yahay qaabkan: `firstname.lastname`. Tusaale ahaan, haddii magacaaga uu yahay John Smith, magacaaga adeegsadaha waa John.Smith.
- Haddii aad u baahan tahay inaad xaqiijiso magacaaga adeegsadaha, fadlan la xiriir Xafiiska Deegaankaaga.

Waa maxay lambar sireedkeyga?


- Lambar sireedkaaga waxaa ku siiyay Hay'adda.
- Lambar sireedyada waa:
 - Inay ahaadaan ugu yaraan 10 xarfood
 - Inuu ku jiro 1 xaraf oo far wayn ah, 1 xaraf far yar ah, 1 lambar, iyo 1 xaraf gaar ah
 - Inaysan wadanin wax ka badan 2 xaraf oo soo noqday oo isku xiga
 - Inaysan wadanin wax ka badan 2 xaraf oo soo noqday oo isku xiga oo ku jira magacaaga
- Tusaalaha lambar sireedka wuxuu u egyahay: *ILoveEvv2021!*
- Haddii aad u baahan tahay inaad xaqiijiso lambar sireedkaaga fadlan la xiriir Xafiiska Deegaankaaga.



Gelidda Marka Koowaad ah

Aynu marka koowaad sahmino sida loo galo Bogga Intarnetka. Adiga oo isticmaalaya kumbiyuutarka Desktop ama Laptop, raac talaabooyinkan:

1. Sahmi <https://orptc.dcissoftware.com/>
2. Geli magaca adeegsadaha iyo lambar sireedka lagu siiyay
3. Haddii aad iloowdo lambar sireedkaaga, guji “Forgot your password?” (“Ma iloowday lambar sireedkaaga?”) Haddi kale, ku sii soco bogga xiga.
4. Guji Sign-In (Gal)



Ogoow: Waxaad baddeli kartaa luuqada aad doorbido adiga oo gujinaya badhanka luuqada ee ku yaala dhinaca midig ee kore. Luuqadda otomaatiga waxaa laga dhigay Ingiriis. Luuqaddaha la heli karo waxaa ka mid ah: Ingiriis, Isbaanish, Ruush, Mandarin, Fiitnaam, Carabi, iyo Somali



Gelidda Marka Koowaad ah

Marki aad gasho marka kuugu horeysa, waxaa lagu sheegi doonaa inaad baddesho lambar sireedkaaga.

1. Ku dul wareeji muuska calaamada wareega ee “i” ee ku taala midig si aad u aragto shuruudaha lambar sireedka
2. Geli isla hal lambar sireed labada meel ee u banaan lambar sireedka
3. Guji Change Password (Baddel Lambar Sireed)

Ma iloowday lambar sireedkaaga? Ka eeg cashirka Hagaajinta Adeegsadaha wixii tilmaamo ah si aad u baddesho lambar sireedkaaga.

The screenshot shows a 'Change Password' form with the following elements:

- 1**: Information icon (i) next to the password input fields.
- 2**: A box highlighting the 'Please enter New Password' and 'Please confirm password' input fields.
- 3**: The 'Change Password' button.

Below the form, a 'Password Criteria' pop-up is visible:


Password Criteria-

1. Must be at least 10 characters.
2. Must contain 1 uppercase letters, lowercase letters, numbers and special characters
3. Must not contain more than two repeated characters in a row.
4. The password should be different from the previous 24 passwords.



Gelidda Marka Koowaad ah


Ka dib marka aad baddasho lambar sireedkaaga, waxaa lagu soo diri doonaa imayla sheegaya inaad baddeshay lambar sireedkaaga.



Su'aashada Ammaanka

Si uu cinwaankaaga badqab u yeesho, waxaad u baahan doontaa inaad doorato su'aasha ammaanka.

1. Guji safka liiska hoos u baxaya
2. Doorro hal su'aal oo aad u maleyso inaad xusuusan doonto jawaabteeda



OR PTC

Please update security details for

your profile test@dcisoftware.com

Question: * Please select Security Question

Answer: Please select Security Question

- What is the middle name of your oldest child?
- What is your oldest sibling's middle name?
- In which city or town did your mother and father meet?
- In which city or town was your first job?
- What is the name of the place your wedding reception was held?
- What is the name of a college you applied to but didn't attend?
- Where were you when you first heard about 9/11?
- Custom Question



Su'aashada Ammaanka


3. Guji Save (Keydi)

Waxaad hadda si guul leh u gashatay su'aasha ammaanka!

Wax Badan oo Ku Saabsan Su'aasha Ammaanka:

- Waxaa kaliya u baahan doontaa inaad doorato su'aashaada ammaanka marka ugu horeysa ee aad gasho.
- Jawaabta waa qasab inay ahaato ugu yaraan shan xaraf mana lahaan karto wax ka badan hal xaraf oo isleh oo isku xiga.

Ogoow: Waxaad u baahan doontaa inaad xusuusato jawaabta su'aasha ammaanka aad dooratay si aad u baddesho lambar sireedkaaga mustaqbalka.




The screenshot shows a security update interface. At the top, there is a logo for 'OR PTC' and 'DCSI'. Below it, the text reads 'Please update security details for your profile test@dcissoftware.com'. There are two input fields: 'Question: *' with a dropdown menu showing 'In which city or town was your first job?' and 'Answer:' with the text 'Eugene'. A blue 'Save' button is at the bottom. A blue circle with the number '3' is overlaid on the right side of the form.



Fariimaha Wararka ah

Ka dib marka aad bogto gelidda, waxaad arki doontaa ugu yaraan hal Fariimaha Wararka ah:




Guji OK (HAYE) si aad u garwaaqsato waxa ku jira Fariimaha Wararka mid kasta.



Guudmarka Dashboard-ka

Hambalyo! Waxaad si guul leh u gashay Bogga Internetka ee OR PTC DCI. Dashboard-ka ayaa ah waxa ugu horeeya ee aad arki doonto markaad gasho. Aynu dib iskula eegno Dashboard-kaaga.



The screenshot displays the OR PTC DCI Dashboard. At the top, there is a navigation bar with the OR PTC DCI logo on the left, a 'HOME' button in the center, and a 'Help' icon with the text 'consumerrep...' on the right. Below the navigation bar, the main content area is divided into two sections. On the left, there is a sidebar with 'DASHBOARD' and 'CLIENTS' options. The main content area shows 'Home / Dashboard' and 'News Posts'. A message box contains the text: 'Welcome to OR PTC DCI!', 'Hello and welcome to OR PTC DCI!', and 'Apr 27, 2021 01:35:13 PM Super UserTwo'. Below this, there is a section titled 'Authorizations' with a search form containing a text input field labeled 'Type Client Name', a blue 'Search' button, and a 'Reset' button. At the bottom right of the dashboard, there is a copyright notice: 'Copyright © 2021 Direct Care Innovations. All rights reserved.'



Guudmarka Dashboard-ka

Waxaad arki doontaa kuwan soo socda:

1. Safka liiska hoos u baxa ee wata luuqada aad doorbido
2. Magacaaga adeegsadhaha.
3. Xiriirye lagu galo Xarunta Caawinta ee DCI
4. Sawir calaamadeed bashqad oo ku geyn doona Qeybta Farriimaha.
5. Fariin muhiim ah oo ka socota Hay'adda oo loo yaqaano Fariimaha Wararka ah.

The screenshot shows the OR PTC DCI dashboard interface. At the top right, there are navigation links for Home, Help, Sitemap, and a user profile dropdown. A search bar is located at the top left of the main content area. The dashboard displays a table for 'Consumer Training' with columns for days of the week and a 'Weekly Total' column. Below the table, there is an 'Authorizations' section with a search bar. At the bottom, there is a 'News Posts' section with a welcome message.

1. User profile dropdown (English)

2. User profile dropdown (consumer tra...)

3. Help link

4. Search bar

5. News Posts section

	Sunday	Monday	Tuesday	Wednesday	Thursday	Friday	Saturday	Weekly Total
Employees	05/02/2021	05/03/2021	05/04/2021	05/05/2021	05/06/2021	05/07/2021	05/08/2021	
Provider Training	0.00	0.00	0.00	0.02	7.75	9.96	0.00	17.73
Total	0.00	0.00	0.00	0.02	7.75	9.96	0.00	17.73

Authorizations

Consumer Training Search Reset

News Posts

Showing 1 out of 1 record

Welcome to OR PTC DCI!
Hello and welcome to OR PTC DCI!
Apr 27, 2021 01:35:13 PM Super UserTwo



Guudmarka Dashboard-ka

Waxaad sidoo kale arki doontaa:

1. Qeybta Entries Requiring Sign Off (Waqti Gelinta u Baahan Ansixinta.) Tani waxay ku tusuni doontaa waqti gelinta u baahan in la ansixiyo.
2. Qeybta Entries (Waqti Gelinta) Tani waxay kuu saqli doontaa inaad aragto dhammaan waqti gelinta Bixiyahaaga.
3. Total Hours Per Week (Wadarta Saacadaha Toddobaadkiiba). Tani waxay muujisaa inta saacadood ee Bixiyahaaga (Bixiyeyaashaada) uu shaqeeyay inta lagu jiray toddobaadka.
4. Oggolaanshaha (oo la mid ah foofarka). Tani waxay muujisaa inta saacadood ee ku jira xilli mushaareedka hadda socda.

The screenshot shows a dashboard interface for 'Consumer Susannah'. The sidebar on the left contains navigation options: 'DASHBOARD', 'ENTRIES REQUIRING SIGN OFF' (highlighted with a blue circle and '1'), and 'ENTRIES' (highlighted with a blue circle and '2'). The main content area displays a table for 'Consumer Susannah' covering the period '02/21/2021 - 02/27/2021'. The table has columns for days of the week and a 'Weekly Total' column. The data is as follows:

	Sunday	Monday	Tuesday	Wednesday	Thursday	Friday	Saturday	Weekly Total
Employees								
Provider Susannah	0.00	0.00	1.05	0.00	0.00	0.00	0.00	1.05
Provider Susannah 3	9.00	0.27	4.67	0.00	0.00	0.00	0.00	13.94
Provider Susannah 4	0.00	1.00	0.00	1.42	0.00	0.00	0.00	2.42
Total	9.00	1.27	5.72	1.42	0.00	0.00	0.00	17.41

Below the table, there is a section for 'Authorizations' (highlighted with a blue circle and '4') with a search bar and 'Search' and 'Reset' buttons. The top of the dashboard includes a search bar for 'Consumer Susannah' and a date range selector.



Oggolaanshaha

OR PTC DCI dhexdiisa, oggolaanshaha waa sida fojarka oo kale - waxay kuu sheegeysaa tirada saacadaha kaaga haray xilli mushaareedka hadda socda. Si aad u aragto oggolaanshahaada, tag bogga Dashboard-ka, oo hoos u bax ilaa iyo Authorizations (Oggolaanshaha). Dashboard-kaaga Authorizations (Oggolaanshaha) wuxuu toos uga hooseeyaa dashboard Total Hours (Wadarta Saacadaha).

The screenshot displays the 'Authorizations' section of the dashboard. It features a search bar with 'Consumer Training' entered and a date range of '05/02/2021 - 05/08/2021'. Below this is a table titled 'Total Hours Per Week'.


	Sunday	Monday	Tuesday	Wednesday	Thursday	Friday	Saturday	Weekly Total
Employees	05/02/2021	05/03/2021	05/04/2021	05/05/2021	05/06/2021	05/07/2021	05/08/2021	
Provider Training	0.00	0.00	0.00	0.02	7.75	9.96	0.00	17.73
Total	0.00	0.00	0.00	0.02	7.75	9.96	0.00	17.73

Below the table, there is a highlighted 'Authorizations' button and another search bar with 'Consumer Training' entered.



Oggolaanshaha

Si aad u muujiso macluumaadkaaga oggolaanshaha ee haddadan, guji badhanka Search (Raadi):



Authorizations

Consumer Susannah

Authorization for Client: **Consumer Susannah**


Service Code	Start Date	End Date	Initial Balance	Remaining Balance	Pre Authorizations Holds	Current Available Balance
Mileage-1	03/02/2018	03/02/2025	100.00	49.00	14.00	35.00
Hourly ADL/IADL-3	02/24/2020	04/11/2022	80.00	80.00	0.00	80.00

Ogoow: Haddii aad ka weydo oggolaanshahaada oo ku qoran Boggaaga Intarnetka, fadlan la xiriir Xafiiska Deegaankaaga.

Oggolaanshaha

Muxuu ka dhigan yahay macluumaadkan?

- **Service Code (Lambarka Adeegga)** - Magaca adeegga lagu siiyay.
- **Start and End Dates (Taariikhaha Bilawga iyo Dhammaadka)** - Waxay matalaan xilli adeegga hadda socda.
- **Initial Balance(Haraagi Hore)** - Wuxuu matalaa inta saacadood ama mayl ee lagu oggolaaday bilowga xilli adeegga hadda socda.
- **Remaining Balance (Haraaga Baakhiga ah)** - Saacadaha ama maylasha kaaga haray inta lagu oggolyahay ka dib marka la bixiyo adeegyada.
- **Pre-authorization Holds (Hakadyada Oggolaanshaha Horudhaca ah)** - Saacadaha ama maylasha adeegyada la bixiyay ee aan wali la ansixinin.
- **Current Available Balance (Haraaga Hadda La Heli Karo)** - Saacadaha ama maylasha hadda diyaarka u ah in la isticmaalo.



The screenshot shows a web interface titled 'Authorizations'. At the top, there is a search bar containing 'Consumer Susannah', a blue 'Search' button, and a 'Reset' button. Below the search bar, it says 'Authorization for Client: Consumer Susannah'. A table displays the following data:

Service Code	Start Date	End Date	Initial Balance	Remaining Balance	Pre Authorizations Holds	Current Available Balance
Mileage-1	03/02/2018	03/02/2025	100.00	49.00	14.00	35.00
Hourly ADL/IADL-3	02/24/2020	04/11/2022	80.00	80.00	0.00	80.00



Eegista Waqti Gelinta

1. Waxaad ka heli kartaa dhammaan waqti gelinta qeybta Entries (Waqti Gelinta)
2. Dhex soco liiska ama isticmaal kala shaandheeyaha raadinta si aad u hesho waqti gelinta
3. Guji Entry ID (Lambarka Aqoonsiga Waqti Gelinta) ee ku jira safka Lambarka Aqoonsiga si aad u eegto faahfaahinta waqti gelintaas

The screenshot shows the 'Entries' page in a web application. The page has a sidebar on the left with a menu containing 'DASHBOARD', 'ENTRIES REQUIRING SIGN OFF', and 'ENTRIES'. The 'ENTRIES' menu item is highlighted with a red box and labeled with a red circle '1'. The main content area is titled 'Home / Entries' and 'Entries'. It features a search form with fields for 'From (MM/DD/YYYY)', 'To (MM/DD/YYYY)', 'Type Punch Id', 'Type Service Code', 'Type Employee Name', and 'Select Unit'. There are 'Reset' and 'Search' buttons. An 'Export' button is also present. Below the search form is a table of entries. The table has columns for 'Id', 'Service Date', 'Type', 'Employee Name', 'Cost Center', 'Service Code', 'Start Time', 'End Time', 'Units', 'Status', and 'EW'. The first row is highlighted with a red box and labeled with a red circle '3'. The table shows 30 records out of 189.

Id	Service Date	Type	Employee Name	Cost Center	Service Code	Start Time	End Time	Units	Status	EW
1464	Apr 25, 2021	Punch	Provider Susannah	Burns APD-EU	Hourly ADL /IADL-1	04:30 PM	05:30 PM	1.00	Pending	Yes
1463	Apr 26, 2021	Punch	Provider Susannah	Burns APD-EU	Hourly ADL /IADL-1	12:00 AM	12:30 AM	0.50	Pending	Yes
1462	Apr 23, 2021	Punch	Provider Susannah	Albany AAA-AUTH	Hourly ADL /IADL-OPI-1	06:30 AM	08:30 AM	2.00	Pending	No
1461	Oct 31, 2020	Punch	Provider Susannah	Burns APD-EU	Hourly ADL /IADL-1	04:08 PM	05:00 PM	0.87	Pending	No
1460	Oct 31, 2020	Punch	Provider Susannah	Burns APD-EU	Hourly ADL /IADL-1	08:00 PM	08:00 AM	12.00	Pending	No
1279	Apr 04, 2021	Punch	Provider Susannah	Albany AAA-AUTH	Hourly ADL /IADL-OPI-1	08:48 AM	10:00 PM	13.20	Pending	No



Waqti Gelinta u Baahan Ansixinta

Bixiyahaaga ayaa sameyn kara waqti gelin u baahan inaad ansixiso ka hor inta aan la bixin mushaharkooda. Waqti gelintaas waxay ka soo muuqaan doonta qeybta Entries Requiring Sign Off (Waqti Gelinta U Baahan Xaqiijinta) ee Boggaaga Intarnetka. Fadlan dib u eeg boggan had iyo jeer.

- **Sign Off (Ansixi)** waqti gelinta saxda ah ee aysan waxba ka qaldaneyn.
- **Reject (Diid)** waqti gelinta aad u maleyso inaysan saxsanayn ama kuwa qaladka ku jiro. Haddii aad diido wax waqti gelin ah, xaalada waqti gelinta waxay isku baddeli doontaa la diiday, waqti gelintana waxba lagama sii baddeli karo ama la ansixin karo.

Ogoow: Inti aad waqti gelin diidi lahayd, waxaad u sheegi kartaa Biixyahaaga inuu wax ka baddelo waqti gelintiisa si uu u saxo.

The screenshot displays a web application interface for managing sign-off entries. The sidebar on the left contains a menu with 'ENTRIES REQUIRING SIGN OFF' highlighted. The main content area features a title 'Entries Requiring Sign Off' and a search form with the following fields: 'From (MM/DD/YYYY)', 'To (MM/DD/YYYY)', 'Type Service Code', 'Type Employee', and 'Select Unit'. There are 'Reset' and 'Search' buttons. At the bottom, there are 'Select All', 'Sign Off', and 'Reject' buttons.



Waqti Gelinta u Baahan Ansixinta

Showing 6 out of 6 records

	<input type="checkbox"/>	1504	Apr 29,	Punch	Provider	Hourly AD	02:40	02:54	Clock In: N/A	0.23	Pending	No	S	R
Id	Service Date	Type	Employee	Service Code	Start Time	End Time	EVV Locations	Units	Status	EV V	Action			

Aynu din u eegno macmuulaamdka ku jira liiskaaga waqti gelinta:

ID (Lambarka Aqoonsiga): Guji Lambarka Aqoonsiga si aad u eegto faahfaahinta waqti gelinta.

Service Date (Taariikhda Adeegga): Taariikhda aad adeegga heshay.

Employee (Shaqaalaha): Magaca Bixiyaha.

Service Code (Lambarka Adeegga): Magaca adeegga aad heshay.

Start/End Time (Waqtiga La Bilaabay/La Dhameeyay): Waqtiga uu Bixiyaha qoray waqtiga bilowga iyo dhamaadka.

End Time (Waqtiga Dhamaadka): Waqtiga uu Bixiyaha qoray waqtiga bilowga iyo dhamaadka.

Units (Tirada): Tirada saacadaha ama maylasha ee waqti gelinta. Tani waa cadadka laga jari doono oggolaanshahaada adeegga haddii la ansixiyo.

